# Dadnimada xadaaradda Islaamka

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

**{يَا أَيُّهَا النَّاسُ اتَّقُوا رَبَّكُمُ الَّذِي خَلَقَكُمْ مِنْ نَفْسٍ وَاحِدَةٍ}**

**(dadyahaw ka cabsada rabbigiina idinka abuuray hal naf)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Islaamka wuxuu taagay xadaarad geysay qiyamka dadnimada meesha ugu sarraysa, waxay u jeexday dadka waddada jacaylka iyo walaaltinnimada iyo cadaaladda iyo sinnaanta, iyadoo loo soo marayo qiyam akhlaaq iyo xadaaro ku salaysan, kuwaas oo wax isu keena ee aan kala geynin, waxna dhisa ee aan duminin, si amaan iyo nabad ay dadka oo dhan u helaan.

Xadaaradda islaamka qiyamkeeda waxay kasoo qaadatay quraanka kariimka iyo sunnada nabawiga; waxaa ka buuxa qiyam dadnimo oo sarreeya, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{يَاأَيُّهَا النَّاسُ إِنَّا خَلَقْنَاكُمْ مِنْ ذَكَرٍ وَأُنْثَى وَجَعَلْنَاكُمْ شُعُوبًا وَقَبَائِلَ لِتَعَارَفُوا إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِنْدَ اللهِ أَتْقَاكُمْ إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ خَبِيرٌ}**

**(dad yahaw waxaanu idinka abuuray lab iyo dhadig ,waxaanu idinka dhignay shucuub iyo qabiilo si aad isugu garataan ,qofka idiinku sharafta badani waa ka idiinku ilaah ka cabsiga badan)**

Aadana Alle ayaa karaameeyay, asoon la eegin isirkiisa ama midabkiisa ama diintiisa, wuxuu leeyahay Alle (caza wa jalla):

**{وَلَقَدْ كَرَّمْنَا بَنِي آدَمَ}،**

**(dhab ahaantii ilma aadam waanu karaamaynay)**

Wuxuu leeyahay nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(كُلُّكُمْ لِآدَمَ، وَآدَمُ مِنْ تُرَابٍ)،**

**(Dhammaantiina Aadan ayaad kasoo jeedaan Aadanna caro ayaa laga abuuray)**

Markii la soo ag marsiiyay nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) janaaso wuu u istaagay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) waxaa lagu

yiri: waa janaaso yahuudi wuxuu yiri (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) sow naf ma aha?!

Waxaa ka mid ah muuqaallada xadaaradda islaamka: inay u sugtay mabda'a xornimada caqiidada si cad aan oggalaanaynin fasiraad, iyo xoriyadda cibaadada, iyo xoriyadda goobaha cibaadada dhammaan, waxayna diidday nooc kaste ka mid ah qasab iyo argagixis, wuxuu leeyahay Alle (caza wa jalla):

**{لَا إِكْرَاهَ فِي الدِّينِ}،**

**(diinta laysku khasbi maayo,)**

Wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَلَوْ شَاءَ رَبُّكَ لَآمَنَ مَن فِي الْأَرْضِ كُلُّهُمْ جَمِيعًا أَفَأَنتَ تُكْرِهُ النَّاسَ حَتَّى يَكُونُوا مُؤْمِنِينَ}،**

**(Hadduu doono rabbigaaga waxaa rumayn lahaa waxa dhulka ku sugan oo dhan, ee ma adaa dad ku qasbi ilaa ay ka noqdaan mu'miniin)**

Wuxuu leeyahay Alle :

**فَذَكِّرْ إِنَّمَا أَنتَ مُذَكِّرٌ * لَّسْتَ عَلَيْهِم بِمُصَيْطِرٍ}،**

**(Ee Waani dadka waxaad tahay waaniyee (Nabiyow) * Mana tihid mid xoog ku leh (qasab))**

Wuxuu leeyahay Alle:

**{إِنْ عَلَيْكَ إِلا الْبَلاغُ}.**

**(korkaaga ma aha waxaan gaadhsiin ahayn)**

Waxaa ka mid ah dhinacyadeeda dadnimada ugu muhimsan: in loo naxariisto dadka taagta daran, iyo in la tixgaliyo dadka dad'a ah, iyo in la siiyo dadka himada leh xuquuqdooda iyadoo dhammaystiran aan naaqus ahayn, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إِنَّمَا يَنْصُرُ اللَّهُ هَذِهِ الأُمَّةَ بِضَعِيفِهَا، بِدَعْوَتِهِمْ، وَصَلاتِهِمْ، وَإِخْلاصِهِم)،**

**(Alle umaddan wuxuu kaliya ugu gargaaraa daciifkeeda ducadooda iyo salaaddooda iyo daacadnimadooda),** wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(لَيْسَ مِنَّا مَنْ لَمْ يَرْحَمْ صَغِيرَنا، ويُوَقِّرْ كَبِيرَنا)،**

**(Naga mid ma aha qofka aan u naxariisanin keena yar keena da'da ahna aan weynaynin)**

Markuu soo maray sayidkeena Cumar bin Alkhadaab (Alle raalli haka noqdee) nin da' weyn oo ka mid ah Ahlu kitaabka oo dadka albaabadooda ku tuugsanaya wuxuu ku yiri sayidkeena Cumar (Alle raalli haka noqdee) dhalinyarnimadaada kuuma garsoorin kaddibna duqnimaaada Ayaan ku dayacnay, wuxuu ka siiyay beytulmaalka wax anfacay, wuxuu leeyahay nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(الرَّاحِمُونَ يَرْحَمُهُمُ الرَّحْمَنُ ارْحَمُوا مَنْ فِي الْأَرْضِ يَرْحَمْكُمْ مَنْ فِي السَّمَاءِ).**

**(Naxariisteyaasha raxmaanka ayaa u naxariista, ee u naxariista kan dhulka ku sugan ha idin naxariistee kan cirka jira)**

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan lagu khatimay anbiyada iyo rususha sayidkeenna Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

Dadnimada xadaaradda islaamka ma ag istaagin la dhaqanka dadka kaliya balse waxay u gudubtay dhaqanka dadka ay la dhaqmaan xayawaanka, wax ka waadaxsan ma jiro in nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) uu naxariis u muujiyay markuu galay beer uu leeyhay nin reer Ansaar ah, rati ayaaba soo aaday (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), oo ka ilmaynaya waxa uu ku sameeyo qofka iska lahaa, wuxuu tirtiray dhagtiisa hoosteeda wuu aamusay, wuxuu yiri: **ratigan yaa iska leh? ratigan yaa iska leh?,** waxaa yimid wiil reer Ansaar ah, wuxuu yiri: anigaa iska leh rasuulkii Allow, wuxuu yiri nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee): (**Ilaahay maa uga**

**baqdid xayawaankan oo Ilaahay ku siiyay wuxuu ii sheegtay inaad gaajo ku dilayso oodna daaliso**)

Sidaas oo kale nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu arkay shinbir oo wadata labo jiiljiil (yaryar) iyadoo laga qaatay jiiljiiladeeda wuxuu yiri (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee): (**yaa ilmaheeda kaga nixiyay? u celiya ilmaheeda**).

Maxaa kaga baahi badan dadka inay helaan mabaadi'dan iyo qiyamka dadnimada oo xadaaraddeena islaamka la gaar noqotay intay soo jirtay.

**Ilaahayow ka dhig dalkeena Masar bashbash iyo barwaaqo iyo dhammaan dalalka caalamka**